JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA XEER ILAALIYAHA GUUD EE QARANKA

جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب النا ئب العام

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

Hab-dhaqanka Xirfadeeed ee Xubnaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qaybta Kowaad: Halbeegga Anshaxa Xirfadeed iyo Hab-dhaqanka

Hawlwadeenada Xeer-Ilaalinta

Qodobka 1aad: Xaddiga Xeer-hoosaadka

1. Xeerkani wuxuu caddaynayaa hab-dhaqanka wanaagsan ee xirfadda ku salaysan ee xeer-ilaaliyayaasha iyo sidoo kale tallaabooyinka iyo hab-raaca lagu dhaqayo xeer-ilaaliye ku xigeenada ku xadgudba xeerarka anshaxa iyo waajibaadka xirfadeed.

2. Xeer-hoosaadkan wuxuu khuseeyaa dhammaan xeer-ilaaliyayaasha ka hawlgala dawladda Federaalka.

3. Iyadoo aan lagu xadgudbaynin hab-dhaqanka iyo waajibaadka xeer-ilaaliyayaasha ee lagu xusay xeer-hoosaadkan, fal kasta oo ka dhan ah sumcadda, madaxbannaanida iyo dhexdhexaadnimada adeegga xeer-ilaalineed ee Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa loo qaadanayaa inuu yahay xadgudub ka dhan ah garsoorka waxaana laga qaadayaa tallaabada ku haboon ee xeerka waafaqsan.

4. Qodobada xeer-hoosaadkan waxay kaloo khuseeyaan shaqaalaha kaaliya hawlaha Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyadoo la raacayo hab-raaca shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.

Qodobka 2aad: Mabda’ Guud

1. Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waa hay’ad garsoor oo madaxbannaan oo ka mas’uul ah bixinta adeegga dacwad-oogidda iyo inay hubiso in dadwaynuhu helaan galaangal cadaaladeed oo hufan. Iyadoo taas laga duulayo hawlwadeenada bixiya adeegga xafiiska waxay u madaxbannaan yihiin inay u gutaan adeegaas si xaq ah oo aan cidna loo eexan iyagoo aan loo gaysan cabsiin ama cagajuglayn sidoo kalana aan lagu samayn raadayn aan haboonayn.
2. Hawlwadeenada Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka waxaa waajib ku ah inay dhawraan oo ay ilaaliyaan sharafta, sumcadda, haybadda iyo madaxbannaanida xafiiska sidoo kalana ay kor-u-qaadaan sumcadda uu xafiisku ku leeyahay bulshadauu u adeego.

Qodobka 3aad: Mabaadi' Gaar ah

Iyadoo aan lagu xadgudbaynin guud ahaanshaha mabda'a lagu xusay Qodobka 2aad, haddana marka ay hawlwadeenada Xafiiska Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ay xilkooda la xiriira kan bulsho, dhinacyada garta iyo muwaadiniintaba gudanayaan ama marka ay cid kale la falgalayaanba waxaa waajib ku ah inay si gaar ah u dhawraan mabaadi'da gaarka ee lagu xusay Qodobada 4-7 ee xeer-hoosaadkan.

Qodobka 4aad: Taxaddarka iyo Hab-dhaqanka Xirfadeed

Ku xigeen xeer-ilaaliye guud waa inuu:

b. Noqdaa shakhsi sharaf leh oo hab-dhaqankiisu yahay mid hufan, daacad ah oo run sheeg ah;
t. Si uu xilkiisa si habsan ugu guto waa inuu leeyahay aqoon sare sidoo kalana fahamsam yahay sharciga iyo ku dhaqankiisaba;
j. Dhawraa, ilaaliyaa sidoo kalana hirgaliyaa sarraynta sharciga, cadaaladda, karaamada banii'aadamka iyo xuquuqaha asaasiga ah ee lagu xusay Dastuurka;
x. Ilaaliyaa danta guud;
Kh. Ku dadaalaa in loo arko inuu yahay qof hufan, madaxbannaan oo aan eexan;
d. Uu u dhaqmaa hab xirfad leh, dadkana ula dhaqmaa si asluubaysan sidoo kalana uu ixtiraamaa kuna dhaqmaa dhammaan sharciyada iyo halbeegyada kale ee la aqoonsan yahay ee la xiriira anshaxa iyo haybadda xirfadda;
r. Ku dadaalaa inuu la socdo macluumaadka iyo isbaddalada xeerka kana warhayaa wixii ku soo kordha oo idil; iyo
s. Inuu mar kasta dhawraa sharafta iyo haybadda xirfadda, u labistaa una dhaqmaa hab u qalma shaqada sidoo kalana ilaaliyaa anshaxa iyo nidaamka maxkamadda.

Qodobka 5aad: Madaxbannaani

Waa inuu u gutaa xeer-ilaaliyuhuxilkiisaiyo ikhtiyaarka(tasarufaadkiisa) la xiriira unkidda, wadida iyo hakinta dacwad ciqaabeedka si ka madaxbannaan faragalin ama raadayn siyaasadeed, dadwayne ama tu maxkamadeed.

Qodobka 6aad: Eex la'aan

Xeer-ilaaliyu waa inuu xilkiisau gutaa iyadoo aan la cabsiin, la qalqaalin ama la raadayn. Gaar ahaan waa inuu:

b. Xilkiisa mar kasta u gutaa si aan eex lahayn, qadiyad kastana waa inuu ka fiiriyaakaliya xagga xirfadda iyo danta guud oo aanu marna eegin danahiisa gaarka ah;

t. Uu ka fogaadaa inuu go'aan ka gaaro arrin khuseeysa ama khusayn kara dano iska horimanaya;

j. Mar kasta tixgaliyaa danta guud isagoo aan dhawrindanaha iyo walaaca dhinacyada iyo warbaahinta sidiila doonaba ha loo soo dhigee;

x. Uu ka fogaado inuu ka qaybqaato arrimo siyaasadeed iyo hawlo kale oo dhaawici kara ama loo arki karo inay waxyeelaynkaraan madaxbannaanida iyo dhexdhexaadnimadiisa;

kh. Aanu raadsan qaadanna wax hadiyad ah, abaalmarin, dhacdhac kale ama ka warhayn kale oo laga yaabo inay dhaawacdo ama loo arki karo inay dhaawacayso haybadda iyo sharafta xirfadda;

d. Mar kasta u dhaqmaa si hufan oo uu si gaar ah fiiro ugu yeesho xuquuqaha lagu xusay Dastuurka, sinnaanta iyo takoorid la'aanta;

r. Uu tixgaliyo dhammaan xaaladaha qadiyada sidoo kalana uu hubiyo inuusameeyo baaritaan maangal ah oo la xiriira caddaymaha, iyadoo aan la eegin in baaritaankaasi uu kabayo ama dhaawacayo eedaysanaha;

s. Dareensanaadaa baahida dhibanayaasha una cadaalad falaa dhibanaha, eedaysanaha iyo bulshada iyadoo la raacayo xeerarka cadaaladda iyo sinnaanta; iyo

sh. Inuu maxkamadda kucaawiyo inay gaarto xukun cadaalad ah, marka eedaysanaha dambiga lagu xukumana la marsiiyo ciqaab ku salaysan caddaymaha la soo gudbiyay.

Qodobka 7aad: Dowrka Xeer-ilaaliyaha ee ku aaddan Maamulka Cadaaladda

1. Xeer-ilaaliyuhu waa inuu xilkiisa u gutaa si caadil ah, hufan oo isla markaana go'aanadahor yaalla ku gaaraa muddo macquul ah; waana inuu

b. Xilkiisa u gutaa si kalsooni ah oo mar kasta waafaqsan sharciga iyo halbeegyada ugu sarreeya xirfadda sharci;

t. Hawsha ku qabtaa mudada loogu talagalay isagoo dabaqaya hab mudnaanta siinaya in galka la gunaanado, sidoo kalana ku dadaalaya inuu galalka uu hayo ku xalliyo wakhtiga ugu macquulsan isagoo u kala horrayasiinaya sida ay u soo kala horreeyeen;

j. Marka uu xeerku u saamaxayo inuu ka qaybqaato ama caawiyo baaritaanka faldambiyeed waana inuu xilkaa u gutaa si hufan, oo aan eex lahayn oo waliba

xirfadaysan isla markaana ku adkaystaa inay hay'adaha baaristu dhawraan awaamirta sharci iyo waliba xuquuqaha banii'aadamka ee asaasiga ah;
x. Inuu si taxaddar leh uga fiirsado isagoo dhawraya xuquuqda eedaysanaha iyo dhibanaha marka ay sidaasi lagama maarmaan tahay inuu oogo dacwad-ciqaabeed rasmi ah ama sii wado dacwadaha la xiriira caruur ama dhallaan;
kh. Marka uu unkayo dacwad-ciqaabeed waa inuu hubsadaa in ay jiraan caddaymo ku filan oo la rumaysan yahay inay tahay mid lagu kalsoonaan karo xeerkuna oggol yahay in la adeegsado uusanna wadin dacwad aan lahayn caddayntaa la xusay; iyo
d. Inta uu gal-dacwadeedku socdo waa inuu u dhagaajiyaa si hufan oo sugan oo cadaalad ku dhisan;

Waliba xeer-ilaaliyuhu waa inuu:

b. Dhawraa qarsoodinimada xirfadda;
t. Ka dhawrsadaa inuu bixiyo hadallo warbaahinta iyo baraha kale ee bulshadu ku xiriirto loogu talagalay ama faallo khusaysa gal-dacwadeed socda ama aanu wali dhamaan mudadiisa rafcaan-qaadashadu;
x. Inuu tixgaliyaa ra'yiga, iyo danaha maangalka ah iyo walaaca ay dhibanayaasha iyo markhaatiyaashu qabaan marka danahooda gaarka ah saamayn ku timaaddo ama ku iman karto sidoo kalana uu ku shaqeeyaa inuu hubiyo in dhibanaha iyo markhaatiyada lala socodsiiyo xuquuqdooda gaar ahaan marka ay dhici karto in loo baahdo ama yimaado magdhaw la siiyo dhibanaha ama la ilaaliyo markhaatiga;
kh. Marka uu codsado dhinac ay khusayso waa inuu bixiyaa sababaha uu ku qaatay ikhtiyaarkaa ama go'aankaa haddii aanay dhaawaci karin xuquuqaha shakhsi ee qof sida dhibanayaal, markhaatiyaal ama eedaysaneyaal ama aanay danta guudi sidaa ku jirin;
d. Inuu mar kasta xaqiijiyo danta dhibanayaasha ama markhaatiyaasha dhallaanka ah;
r. Inuu dhawro xuquuqaha eedaysanaha sida uu sharciga iyo halbeegyada caalamiga ah ee khuseeya xuquuqaha banii'aadamka iyo habka garqaadida cadaaladda ku dhisani qabaan;
s.Waa inuu mudada ugu macquulsan ku siiyo eedaysanaha macluumaadka la xiriira galka ee ama lidka ku ah ama kabaya sida uu sharciga iyo habka garqaadida cadaaladda ku dhisani qabaan;
sh. Inuu rogrogaacaddaymaha galka la xiriira si uu u xaqiiqsado in lagu helay hab sharciga iyo dastuurka waafaqsan;

dh. Inaanu adeegsancaddaymo la aaminsan yahay in lagu helay qaab aan sharciyaysnayn oo keeni kara in uu dhaco xadgudub foolxun oo ku dhaca xuquuqaha banii'aadam ee eedaysanaha gaar ahaan kuwa lagu helay jirdil ama si naxariista ka baxsan;

c. Inuu qaadaa dhammaan tallaabooyinka lagama marmaanka u ah hubinta in anshaxmarin la marsiiyo kuwa ka mas'uulka ah isticmaalkacaddaymaha sharciga ka baxsan; iyo

g. Haddii marka lagu gudajiro, la diyaarinayo dacwad-ciqaabeedka ama la dhagaysanayaba uu xeer-ilaaliye dareemo in ay jiraan macluumaad la xiriira in danbi aan la baarin ama dacwad lagu oogin la galay, waa inuu isla markaaba si qoraal ah ugu sheegaa Booliska faahfaahinta arrintaa.

Qaybta Labaad: Tallaabooyinka Anshaxmarinta

Qodobka 8aad: Ujeedooyinka iyo Dhaqangalinta Tallaabooyinka Anshaxmarinta

1. Xeer-ilaaliyihii ka gaabiya ama qabsan waaya xilkiisa ama gala dhaqanxumo la xirriirta xirfadda waxaa laga qaadayaa tallaabo anshaxmarineed sida uuqabo Anshaxa iyo Hab-dhaqanka xirfadeed ee xeer-ilaaliyayaasha.
2. Ujeedada talaabooyinka anshaxmarineed waa in lagu saxo xeer-ilaaliyayaasha gala dhaqanxumo iyo in lagu baraarujiyo inay xilkooda u gutaan si hufan sidoo kalana waa in kuwa aan dhaqanxumada ka waantoobin la mariyaaanshaxmarin ku habboon oo gaarikarta in xilka laga qaado.

Qodobka 9aad: Asaaska Tallaabooyinka Anshaxmarineed

Asaaska tallaabooyinka anshaxmarineed ee xeer-ilaaliye waxay noqon karaan:

b. Dhaqanxumo culus; iyo

t. Dhaqanxumofudud;

Qodobka 9.1. DhaqanxumoCulus

Waxaa dhaqanxumo culus loo qaadanayaa falalkahoos ku xusan ee ka dhanka ah Anshaxa iyo Hab-dhaqanka Xirfadeed ee Xeer-ilaaliyayaasha:

b. Qaadashada iyo waydiisashada laaluush iyo qaadasahada ama aqbalidda hadiyad laga qaato qof laga yaabo inay dani ka gasho gal-dacwadeed;

t. In uu u eexdo dhinac isagoo eegaya dantiisa gaarka ah ama danaha cid kale;

j. Inuu ixsaan sameeyo ama been abuuro nuqul qoraal ah si uu u helo fa'iido aan sharci ahayn ha ahaato mid uu gaar u leeyahay ama mid cid kale leedahayba;
x. Inuu xaalad uu abuuray keento inay ku hagto go'aan aan haboonayn oo lagu qaato si taxaddar darro ah am ula kac ah iyadoo la qarinayo xogaha hawsha ku habboon ee meesha ku jira;
kh. Inuu abuuro carqalad isagoo daahinaya adeegga bulshada iyadoo aanay jirin sabab maangal ah;
d. Inuu si joogto ah uga maqnaado goobta shaqo iyadoo aanay jirin sabab ku habboon ama uusan fasaxqaadan;
r. Inuu caadaysto muran ama ku kaco fal ka dhan ah anshaxa guud ama dhaqanka shaqo ee suubban;
s. Inuu waxyeeleeyo qalabka xafiiska si ula kac ah ama taxaddar darro foolxun ah; ama
sh. Inuu diido amaka baaqsado inuu fuliyo amar cad oo sharci ah oo Xeer-Ilaaliyaha Guud ku siiyo si af ah ama qoraal ah;
dh. Inuu xubin ka noqdo xisbi ama urur siyaadeed ama uu u ololeeyo ama u muujiyo xisbi siyaasadeed taageero aan qarsoodi ahayn;
c. Inuu oogo dacwad-ciqaabeed isagoo og inaaney jirin wax caddaymo ah oo arrintaa la xiriira;
g. Inuu si ula kac ah u marin habaabiyo sharciga adeegsadana xeer aan meesha ku haboonayn; iyo
f. Inuu ku kaco dhaqanxumo kale oo loo arki karo inay u dhiganto kuwa kor lagu xusay.

Qodobka 9.2. Dhaqanxumo Fudud

Waxaa dhaqanxumo fudud loo qaadanayaa falalka hoos ku xusan ee ka dhanka ah Anshaxa iyo Hab-dhaqanka Xirfadeed ee Xeer-ilaaliyayaasha:

b. Inuu ka gaabsado inuu xilkiisa u guto si taxaddar iyo mas'uuliyad ku dheehan tahay iyo inuu sidoo kaleaanu muujin dadaal xirafadeed;
t. Inuu horistaago habsami u socodka shaqada isagoo aan la shaqayn jaalkiisa iyo cidda danaysa hawlaha xafiiska;
j. Inuu lacag ka daynsado qof dan toos ah ama mid dadban ka leh galka uu gacanta ku hayo;
x. Inuu faafiyo ama u sheego cid aanu xeerku u oggalayn macluumaad la xiriira gal-dacwadeedka ama geeddi socodkiisa ama macluumaad kale oo qarsoodi ah;

kh. Inuu ku kaco dhaqanxumo kale oo loo arki karo inay u dhiganto kuwa kor lagu xusay.

Qodobka 10aad: Tallaabooyinka Anshaxmarin

1. Xeer-ilaaliyaha loo arko inuu ku xadgubo Anshaxa iyo Hab-dhaqanka Xirfadeed ee Xeer-ilaaliyayaasha waxaa lagu qaadayaa anshaxmarinta soo socota iyadoo hadba la eegeeyo xadka uu la eg yahay xadgudubkaasi:
    b. Digniin af ah;
    t. Digniin qoraal ah;
    j. Ganaax aan ka badnayn hil biloo mushaar ah;
    x. In laga horistaago mushaar kordhinta ugu horraysa;
    kh. In hal darajo hoos loo dhigo; ama
    d. In xilka laga qaado.

2. Xeer-ilaaliye waxaa lagu qaadi karaa:
    a. Tallaabooyinka anshaxmarin ee lagu xusay Qodobka 10(1) (b), (t) iyo (j), marka lagu helo dhaqanxumo fudud sida ku xusan Qodobka 9.2 ee Xeer-hoosaadkan;
    b. Tallaabooyinka anshaxmarin ee lagu xusay Qodobka 10(1) (j) ilaa (kh)marka lagu helo dhaqanxumo foolxun sida ku xusan Qodobka 9.2 ee Xeer-hoosaadkan;

Qodobka 11aad: Nidaamka Anshaxmarinta Xeer-Illaaliyayaasha

1. Dacwad kasta oo anshaxmarin waa in loo soo gudbiyaa si qoraal ah oo nuxurkeedu si cad u qeexan yahay sidoo kalana ay faahfaahsan tahay arrimaha xaqiijinaya dhabnimadeeda.
2. Marka dacwad anshaxmarineed oo qoraal ah kana dhan ah ku xigeen Xeer-Illaaliye la horkeeno Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka,waxaa arrintaa galaya Guddi ka kooban Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo laba Xeer-Ilaaliye ku xigeen oo Xeer-Ilaaliyaha Guud magacaabo.
3. Guddigaasi wuxuu uruurinayaa xogta la xiriirta dacwadda anshaxmarinta, waxaana la siinayaa fursad uu ku xigeenka Xeer-Illaaliye isku difaaco.
4. Guddigaasi wuxuu hubinayaa nooca dacwadda wuxuuna go'aan ka gaarayaa in falka ay dacwaddu la xiriirto yahay mid culus ama fudud sida ku xusan Qodobada 9.1 iyo 9.2 ee Xeer-hoosaadkan.

5. Haddii uu Guddiga xaqiiqsado in falka la galay yahay mid fudud wuxuu go'aamin karaa in ku xigeenka Xeer-Illaaliye lagu qaado anshaxmarinta ku xusan Qodobka 10(1) (b), (t) iyo (j) ee Xeerkan.
6. Haddiise Guddigu go'aamiyo in falka la galay uu yahay mid culus wuxuu faah-faahinta dacwadda iyo go'aankoodaba u gudbinyaa Golaha Adeegga Garsoorka si loo mariyo anshaxmarinta ku habboon ee Xeerka ku xusan.
7. Guddigu wuxuu soo jeedin karaa in ku xigeenka Xeer-Ilaaliye shaqada laga joojiyo muddo aan ka badnayn saddex bilood ama inta uun go'aan uga gaarayo Golaha Adeegga Garsoorka haddii ku xigeenkaa lagu helay dhaqanxumo culus oo ka mida kuwa lagu xusay Qodobka 9.2 ee Xeerkan.

Qodobka 12aad: Nidaamka Anshaxmarinta Hawlwadeenada kale ee Xeer-Ilaalinta

Anshaxmarinta hawlwadeenada kale ee Xeer-Ilaalinta waxaa loo marayaa habka ku xusan Qodobka 11aad. Laakiin falka anshaxmarintoodu ha ahaado mid fudud ama mid culus waxaa go'aan kama dambays ah ka gaaraya Guddigaa kor ku xusan ee ka kooban Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo labada ku xigeen ee uu magacaabo.

Qodobka 12^{aad}: Dhaqangalka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa bil kaddib marka uu saxiixo Wasiirka Cadaaladda iyo Arrimaha Garsoorka ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.